



Xeerka Saameynta Isu-geynta ee La Soo Jeediyay Kulanka Wacyigelinta Dadweynaha

Ajendaha

- Soo dhaweyn iyo isbarasho
- Dulmar guud oo ku saabsan habka dejinta xeerarka
- Dulmar guud oo ku saabsan xeerka la soo jeediyay
 - Cidda uu xeerku khuseeyo iyo awoodaha sharciyeed
 - Tallaabooyinka waaweyn ee xeerka
- CI-MAP
 - Sida uu ugu xiran yahay xeerka
- Jadwalka dejinta xeerka iyo tallaabooyinka xiga



Ilaha iyo Agabka Dejinta Xeerarka ee MPCA

Bogga Xeer-dejinta Saameynta Isu-geynta

- <https://www.pca.state.mn.us/get-engaged/cumulative-impacts>
- Halka lagu daabaco dukumeentiyada dejinta xeerka iyo macluumaad kale oo la xiriira xeer-dejinta
- Xiriiriyeyaasha duubista webinaarradii hore iyo soo koobitaannada kulamadii shaqada
- Xiriiriyeyaasha lagu gudbin karo faallooyinka qoran ee daneeyayaashu ay soo diraan

Bogga Xeerarka La Soo Jeediyay

- <https://www.pca.state.mn.us/get-engaged/proposed-rules>
- Wuxuu muujinayaa mashaariicda xeer-dejinta ee hadda socda, oo ay ku jirto Diiwaanka Dadweynaha ee Xeer-dejinta
- [Ku hel cusboonaysiinta xeerarka aad xiisaynayso adigoo iimayl ku helaya](#)



**Bogga Xeer-dejinta
Saameynta Isu-geynta**



Dulmar Guud oo ku Saabsan Habka Dejinta Xeerarka



Fursadaha Ka-qaybgalka Dadweynaha

- **Codsi faallooyin — muddada faallooyinka dadweynaha**
- **Kulamo wacyigelin iyo kulamo dadweyne**
- Qabyo-qoraalka xeerarka iyo Bayaanka Baahida iyo Macquulnimada (SONAR)
- **Ogeysiiska Ujeeddada Ansixinta xeerarka la soo jeediyay — muddada faallooyinka dadweynaha**
- **Dhageysi dadweyne**
 - **Faallooyin inta lagu jiro dhageysiga iyo muddada faallooyinka kadib dhageysiga**
 - **Muddada jawaab-celinta ee shanta maalmood ee shaqada**
- Jawaabta hay'adda ee faallooyinka
- Xafiiska Dhageysiyada Maamulka
 - Dib-u-eegis garsoor iyo ansixinta ama diidmada xeerarka
- Dib-u-eegista xeerarka ee Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka iyo Amarka Ansixinta Xeerarka
- Daabacaadda Ogeysiiska Ansixinta



Sida Loo Helo Ogeysiisyada Xeerarka ee MPCA

MPCA waxay dirtaa iimayllo si ay dadweynaha ugu wargeliso marxadaha muhiimka ah ee habka dejinta xeerarka

Ugu yaraan, ogeysiisyo ayaa la diraa marka:

- Isbeddellada xeerarka markii ugu horreysay la tixgelinayo (Codsiga Faallooyinka)
- Xeerarka la soo jeediyay loo bandhigo faallooyinka dadweynaha (Ogeysiiska Ujeeddada Ansixinta Xeerarka La Soo Jeediyay)
- Xeerarka cusub ay dhaqan galaan (Ansixinta Ugu Dambaysa ee Xeerarka)

Si aad u hesho ogeysiisyada, iska diiwaangeli iimaylka
GovDelivery: <https://www.pca.state.mn.us/>

Kulamada Dadweynaha iyo Muddada Faallooyinka

May 18, 2026-
Luulyo 17, 2026

**Muddada
faallooyinka
dadweynaha ee
xeerka la soo
jeediyay (kahor
dhageysiga)**

Juun 2, 2026
6-7 fiidnimo

**Kulanka
wacyigelinta
dadweynaha**

Waxaa lagu bixin doonaa dulmar ku saabsan xeerarka la soo jeediyay, faallooyinna si toos ah loogama aqbali doono kulankan

Sebtembar. 1,
2026
3-6 galabnimo
(ugu yaraan)

**Dhageysiga
dadweynaha**

Waxay siinayaa dadweynaha fursad ay faallooyin afka ah ugu gudbiyaan Garsoore Kimberly Middendorf

Sebtembar. 1,
2026-
Sebtembar. 21,
2026

**Muddada
Faallooyinka
Kadib
Dhageysiga**

Waxay siinaysaa dadweynaha fursad ay faallooyin qoran ugu gudbiyaan Garsoore Kimberly Middendorf

Sebtembar. 22,
2026-
Sebtembar. 28,
2026

**Muddada Jawaab-
celinta ee Shanta
Maalmood ee
Shaqada**

- MPCA iyo qof kasta oo daneeya waxay ka jawaabi karaan macluumaad kasta oo hore loo gudbiyay
- Qofna ma gudbin karo caddayn cusub muddadan gudaheeda

Gudbinta Faallooyinka Qoran

Ku gudbi faallooyinkaaga qoran ee ku saabsan xeerarka la soo jeediyay ugu dambayn Luulyo 17, 2026:

- Nidaamka e-Comments ee Xafiiska Dhageysiyada Maamulka
 - <https://minnesotaoah.granicusideas.com/>
- Hababka kale ee lagu tilmaamay Ogeysiiska Ujeeddada Ansixinta
 - Boostada Mareykanka (U.S. Mail), keenis shaqsiyeed, ama fakis.
- **Faallooyinka waa in la soo gudbiyaa ugu dambayn 4:30 galabnimo**

Xiriirka bogga e-Comments sidoo kale waxa laga heli karaa bogga xeer-dejinta:

- <https://www.pca.state.mn.us/get-engaged/cumulative-impacts>



E-Comments



**Bogga Xeer-dejinta
Saameynta Isu-geynta**



Cidda uu Xeerku Khuseeyo iyo Awoodaha Sharciyeed

Saameynta Isu-geynta


Aqoonsiga Dib-u-eegaha: R-04805

- Xeerkan waxa uu ka dhashay dadaallada u doodista ee ay sameeyeen dad badan oo kala duwan.
- Ujeeddada guud ee xeerka:
 - In wax laga qabto sida aan sinnayn ee dadka Minnesota ugu nugul yihiin wasakhowga (taasoo diiradda saaraysa saameynta ka jirta aagagga caddaaladda deegaanka)
 - Wuxuu khuseeyaa codsiyo gaar ah oo rukhsadaha hawada ah oo ku yaal aagagga caddaaladda deegaanka
 - Sharci-dejinta Minnesota waxay dejisay qaab-dhismeed guud oo ay ku jiraan qaar ka mid ah faahfaahinta muhiimka ah
 - MPCA waxaa loo xilsaaray inay qeexo oo dejiso qaybo badan oo kala duwan oo ka mid ah xeerkan rule
- Waxaa jiray 36 bilood oo lagu daabacayo Ogeysiiska Ujeeddada Ansixinta – May 25, 2026
 - Ogeysiiska waxaa la daabacay May 18, 2026

Ku-dhaqanka Xeerka


- Wuxuu khuseeyaa aagagga caddaaladda deegaanka iyo aag buffer ah oo hal mayl ah
 - Aagga metro ee Toddobada Degmo ee Twin Cities; ama
 - Magaalooyinka heerka koowaad (Rochester iyo Duluth)
- Wuxuu khuseeyaa codsiyada rukhsadaha waaweyn (Title V) iyo rukhsadaha gobolka
 - Kaliya codsiyada rukhsadaha hawada
 - Waxa uu ka kooban yahay xarumo cusub, ballaarinta xarumaha jira, iyo dib-u-bixinta rukhsadda xarun hore u jirtay
- [Xarumaha laga yaabo inay saameeyaan sharciga cusub ee Minnesota ee saameynta isu-geynta \(aq-rule2-25f\)](#)

Aagagga Caddaaladda Deegaanka



Sharci-dejinta Minnesota ayaa ku qeexday “aagagga caddaaladda deegaanka” xeerarka Minnesota


- 40% ama ka badan dadka deegaanka waa dad aan caddaan ahayn
- 35% ama ka badan qoysaska waxay leeyihiin dakhli u dhigma ama ka hooseeya 200% heerka saboolnimada (qiyaastii \$60,000 qoys ka kooban afar qof)
- 40% ama ka badan dadka da’doodu ka weyn tahay shan sano waxay leeyihiin aqoon xaddidan oo luqadda Ingiriisiga ah
- Waxay ku taal gudaha Indian Country



- Environmental justice areas
- One mile buffer
- Tribal land


Aagagga Caddaaladda Deegaanka ee Aagga Metro ee Toddobada Degmo ee Twin Cities

Aagagga Caddaaladda Deegaanka ee Duluth iyo Rochester



Duluth


- Environmental justice areas
- One mile buffer
- Tribal land
- Duluth city limits



Rochester

- Environmental justice areas
- One mile buffer
- Rochester city limits

Laba kulan oo dadweyne ayaa loo baahan yahay, mid ka hor iyo mid ka dib falanqaynta saamaynta isbiirsatay. Kulamo dheeraad ah ayaa lagu dari karaa.



Kulamada dadweynaha iyo faallooyinka*

- Qeex hababka loo qabanayo kulamada iyo sida loo maareynayo faallooyinka sida uu sharcigu dhigayo.

Falanqaynta saamaynta isbiirsatay*

- Caddee waxyaabaha laga rabo inay falanqayntu ka koobnaato.
- Bixi ilaha macluumaadka dadweynaha.

Saamaynada weyn ee waxyeellada leh*

- Qeex shuruudaha ama halbeegyada lagu go'aaminayo saamayn weyn oo waxyeello leh oo ku timaadda deegaanka ama caafimaadka.
- Haddii la ogaado saamayn weyn oo waxyeello leh, heshiis faa'iido bulsho ayaa loo baahan yahay.

Heshiiska faa'iidada bulshada*

- Qeex waxa uu heshiisku ka koobnaanayo iyo habraaca lagu heliyo talooyinka dadweynaha.
- *MPCA* iyo xaruntu waxay saxiixayaan heshiiska.
- Haddii la ogaado saamayn weyn oo waxyeello leh oo aan lagu heshiin karin heshiis faa'iido bulsho, rukhsad lama bixin karo.

* Waxaa lagu qeexi doonaa xeerka.

Dulmar guud oo ku saabsan Xeerka Saameynta Isu-geynta ee La Soo Jeediyay

Guud ahaan

- In la sameeyo qaab-dhismeed sharciyeed oo lagu fulinayo tilmaamaha sharci-dejinta
- In la abuurro hab hufan, la maamuli karo, isla markaana buuxinaya ujeeddooyinka sharciga
- In la awoodo in lagu xisaabtamo xaaladaha gaarka ah ee kala duwan
- Diiradda waxaa la saarayaa fahamka saameynta caafimaad iyo deegaan ee ka dhalan karta bixinta rukhsad
- In la bixiyo hab joogto ah oo lagu falanqeeyo laguna maareeyo saameynta deegaanka iyo caafimaadka
- In dadka Minnesota la siiyo awood ay si macno leh uga qayb qaataan go'aannada saamayn kara caafimaadkooda iyo deegaanka ay ku nool yihiin, ka shaqeeyaan, ama ku kulmaan

Soo Koobidda Xeerka

- Xeerarka saameynta isu-geynta waxay ka kooban yihiin **Minn. R. 7007.6000 to 7007.6120**
 - [Dulmarka xeerka saameynta isu-geynta ee la soo jeediyay – Ingiriisi \(aq-rule2-25au\)](#)
 - [Dulmarka xeerka saameynta isu-geynta ee la soo jeediyay – Isbaanish \(aq-rule2-25av\)](#)
- Shuruudaha qaab-dhismeedka iyo kuwa taageeraya
 - Baaxadda xeerka ee **Minn. R. 7007.6000**
 - Qeexitaannada ku jira **Minn. R. 7007.6010**
 - Ku-dhaqanka xeerka iyo habraacyada ku jira **Minn. R. 7007.6020**
 - Shuruudaha guud ee ku jira **Minn. R. 7007.6040**
 - Go'aannada rukhsadaha ee ku jira **Minn. R. 7007.6120**
- Wax-ka-beddello maamul iyo habayn ah oo lagu sameeyay **Minn. R. 7007.0050 to 7007.1850**

Soo Koobidda Xeerka, oo Sii Socota

7007.6030: La-tashiga iyo iskaashiga qabiilooyinka

7007.6050-7007.6070: Go'aaminta goorta loo baahan yahay falanqaynta saameynta isu-geynta

- Qiimeynta Bilowga ah, Habka Codsiga, iyo Go'aaminta Baahida

7007.6080: Ka-qaybgalka dadweynaha

7007.6090: : Waxyaabaha ay tahay inay ka koobnaato falanqaynta saameynta isu-geynta

7007.6100: Saameynaha waaweyn ee taban

7007.6110: Heshiisyada faa'iidada bulshada (CBAs)

7007.6115: Wax-ka-beddelka heshiisyada faa'iidada bulshada (CBAs)

Tusaale ahaan isbeddelka xeerka

4.2 **7007.0850 OGEYSIISKA CODSIGA RUQSADDA IYO FAALLOOYIN.**

4.3 *[Qoraalka farqadda-hoosaadkan 1aad, eeg Xeerarka Minnesota]*

4.4 **Farqad-hoosaad 2. Ogeysiiska dadweynaha iyo faallooyinka.**

4.5 *[Qoraalka qodobada A ilaa D, eeg Xeerarka Minnesota]*

4.6 **E.** Ka hor inta aan la bixin, dib loo bixin, ama wax-ka-beddel dhexdhexaad ah ama weyn lagu samayn ruqsad, guddoomiyuhu waa inuu u hoggaansamaa habraacyada ku xusan qodobka A, farqadaha-hoosaadyada (1) ilaa (3), haddii falanqaynta saamaynta isu-geynta ah (cumulative impacts analysis) ee ku cad qaybta 7007.6090 looga baahan yahay codsiga ruqsadda.

4.9 **F.** Marka la codsado, guddoomiyuhu waa inuu bixiyo liis kooban oo soo koobaya hawlaha hadda socda ee la xiriira codsiyada ruqsadaha, codsiyada wax-ka-beddellada yaryar, dhexdhexaadka ah, iyo kuwa waaweyn, iyo codsiyada wax-ka-beddellada maamul. Guddoomiyuhu wuxuu isticmaali karaa bogga internetka ee hay'adda halkii uu ka bixin lahaa liis qoraal ah.

4.13 **Farqad-hoosaad 3. Codsiyada shirarka iyo dhegeysiyada.**

4.14 **A.** Inta lagu jiro muddada faallooyinka dadweynaha, qof kasta wuxuu, marka la eego qabyo-qoraal kasta oo ruqsad ah ama wax-ka-beddel lagu sameynayo oo ku xiran ogeysiiska dadweynaha sida ku cad farqad-hoosaad 2, qodobada A ilaa E, codsan karaa:

4.16 *[Qoraalka farqadaha-hoosaadyada (1) iyo (2), eeg Xeerarka Minnesota]*

Falanqaynta saamaynta isbiirsatay ayaa loo baahan doonaa haddii mid ka mid ah shuruudahan la buuxiyo.



Nooca rukhsadda

- Waxay khusaysaa rukhsadaha waaweyn (*Title V*) iyo rukhsadaha gaarka ah ee gobolka.
- Waxay noqon kartaa rukhsad cusub, la ballaariyay, ama dib loo bixiyay.

Goobta

- Waa inay ku taallaa aag caddaaladda deegaanka ah oo la aqoonsaday ama aagga ku xeerar (*buffer*).
- Waxay khusaysaa oo keliya deegaanka magaalooyinka mataanaha ah (*Twin Cities metro area*), Rochester, iyo Duluth.
- La-tashi la xiriira Dhulka Qabiilooyinka Hindida (*Indian Country*).

Halbeegyada*

- Qeex halbeegyada cabbirka sida culeysyada deegaanka ee ku xeeran iyo macluumaadka rukhsadda.
- Haddii halbeegyada la dhaafo, falanqayn saamayn isbiirsatay ayaa loo baahan yahay.

Habraaca codsiga*

- Qeex habraaca iyo foomka lagu codsanayo falanqayn saamayn isbiirsatay.
- Caddeymo muhiim ah ayaa taageeraya baahida loo qabo falanqaynta saamaynta isbiirsatay.

* Waxaa lagu qeexi doonaa xeerka.

Qiimeynta Bilowga ah, Codsiyada, iyo Go'aaminta Baahida

Qiimeynta Bilowga ah

Qiimeynta bilowga ah waa in lala soo gudbiyaa codsiga marka la buuxiyo shuruudaha ku-dhaqanka xeerka, iyadoo ay jiraan qaar ka mid ah faahfaahinahan:

- Codsiyada dhismaha cusub ama dib-u-bixinta rukhsadda waxay u baahan yihiin oo keliya inay buuxiyaan shuruudaha nooca rukhsadda iyo ku-dhaqanka juqraafiyeed
- Codsiyada ballaarinta xarunta waa inay sababaan koror ku yimaada qiiqa wasakhawga ee suurtagalka ah ama ay sababaan in xaruntu ku waajibto inay hesho rukhsad



Qiimeynta Bilowga ah, oo Sii Socota

Waxay ka kooban tahay go'aaminta milkiilayaasha iyo hawl-wadeennada ee ku saabsan in rukhsaddu ay u badan tahay inay saameyn ku yeelato deegaanka ama caafimaadka.

Waxay ka kooban tahay macluumaad muhiim u ah MPCA si ay u go'aamiso in falanqaynta saameynta isu-geynta (CI analysis) loo baahan yahay iyo in kale

- Saameynta ku yeelan karta caafimaadka iyo deegaanka ee aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaari karto.
- Qiimeyn lagu sameeyo heerarka cabbirka (benchmarks) si loo go'aamiyo in falanqaynta saameynta isu-geynta (CI analysis) loo baahan yahay iyo in kale

MPCA waxay ogeysiis ku saabsan helitaanka qiimeynta bilowga ah ku daabacdaa boggeeda internetka

Habka Codsiga

Waxay la mid tahay habka codsiga ee Guddiga Tayada Deegaanka (Environmental Quality Board – EQB) ee dib-u-eegista deegaanka

- Xeerarka ma bixiyaan qeexitaan gaar ah oo ku saabsan “caddayn muhiim ah” (material evidence), balse waxay dejinayaan shuruudaha lagu go’aaminayo goorta codsiga la oggolaanayo
- Xeerarka waxay qeexayaan waxa ay tahay in codsigu ka koobnaado iyo sida MPCA u dib-u-eegi doonto
- Codsiyada waxaa la gudbin karaa wakhti kasta ilaa dhammaadka muddada ogeysiiska dadweynaha ee qabyo-qoraalka rukhsadda hawada.

MPCA waxay ogeysiis ku saabsan helitaanka codsiga ku daabacdaa boggeeda internetka.



Habka Codsiga, oo Sii Socda

Waxyaabaha ay tahay inuu codsigu ka koobnaado

- Macluumaadka aqoonsiga ee rukhsadda laga hadlayo iyo dadka codsiga gudbinaya
- Magacyada, cinwaannada boostada, iyo saxiixyada shakhsiyaadka
- Sharaxaad ku saabsan saameynaha suurtagalka ah
- Caddayn muhiim ah oo taageeraysa codsiga iyo saameynaha suurtagalka ah

Dib-u-eegista MPCA

- Dib-u-eegis dhammaystirnaan si loo xaqiijiyo in dhammaan macluumaadka loo baahan yahay la soo gudbiyay
- Caddaynta muhiimka ahi waa inay muujisaa in bixinta rukhsaddu ay suuragal tahay inay saameyn weyn ku yeelato deegaanka ama caafimaadka dadka**.

CI Go'aaminta Baahida Falanqaynta

Dhammaan xarumaha buuxiya shuruudaha ku-dhaqanka xeerka waa inay qiimeeyaan in looga baahan yahay inay sameeyaan falanqaynta saameynta isu-geynt.

- Dhammaan xarumaha looma baahna inay sameeyaan falanqayn
- Qiimeynta bilowga ahi waxay eegtaa heerarka cabbirka iyo saameynta deegaanka iyo caafimaadka
- Qiimeynta codsigu waxay eegtaa caddaynta muhiimka ah iyo saameynta deegaanka iyo caafimaadkah.



CI Go'aaminta Baahida Falanqaynta, oo Sii Socota

MPCA waxaa laga rabaa inay go'aamiso haddi:

- Rukhsadda ay si weyn u saameyn karto deegaanka ama caafimaadka
- Falanqaynta saameynta isu-geynta (CI analysis) loo baahan yahay.

Waxaa lagama maarmaan ah in la qiimeeyo labadaba heerarka cabbirka (benchmarks) iyo saameynta caafimaadka iyo deegaanka

MPCA waa inay diyaarisaa oo ku daabacdaa boggeeda internetka dukumeentiga go'aanka.



Falanqaynta Saameynta Isu-geynta ee Waajibka ah iyo tan Ikhtiyaariga ah

Falanqaynta Saameynta Isu-geynta ee Waajibka ah:

- Facility Xarunta waxay ka sarreysaa heerarka cabbirka ee lagu dejiyay xeerka
- MPCA waxay go'aamisaa in bixinta rukhsaddu ay si weyn u saameyn karto deegaanka ama caafimaadka.

Falanqaynta Saameynta Isu-geynta ee Ikhtiyaariga ah:

- MPCA waxay go'aamisaa in falanqaynta saameynta isu-geynta (CI analysis) ay lagama maarmaan tahay isla markaana ay taageerayso caddayn muhim ah
- Codsiga waxaa taageeraya caddayn muhiim ah oo muujinaysa in bixinta rukhsaddu ay yeelan karto awood ay si weyn ugu saameyso deegaanka ama caafimaadka dadka.



Falanqaynta Saameynta Isu-geynta ee Waajibka ah

Heerarka cabbirka ee lagu go'aaminayo baahida falanqaynta saameynta isu-geynta:

- Mar walba waa loo baahan yahay dhismaha cusub.
- Waxaa loo baahan yahay marka la ballaarinayo xarun haddii ay ka sarreyso heerarka qiiqa ee la cayimay.
- Waxaa loo baahan yahay marka dib loo bixinayo rukhsad haddii MPCA, EPA, ama degmada ay soo saareen tallaabo fulin sharciyeed saddexda sano ee ka horreeya taariikhda codsiga rukhsadda.



Saameynta caafimaadka iyo deegaanka waxay la mid tahay shuruudaha go'aan qaadashada ee EQB ee dib-u-eegista deegaanka, kuwaas oo qiimeeya:

- Saameynaha suurtagalka ah.
- Saameynaha isugeynta ee suurtagalka ah iyadoo la tixgelinayo muhiimaddooda iyo kaalinta xarunta.
- Tallaabooyinka lagu baabi'inayo, lagu yaraynayo, ama lagu khafiifinayo saameynaha (kuwa ay qaaddo xaruntu, MPCA, ama hay'adaha kale ee sharciyeynta).
- Heerka ay suurtagal tahay in saameynaha la sii saadaaliyo ama la xakameeyo.

Falanqaynta Saameynta Isu-geynta ee Ikhtiyaariga ah

Waxay u oggolaanaysaa MPCA inay tixgeliso arrimo laga yaabo inaynaan maanta ogeyn:

- Lama samayn karo liis dhammaystiran oo sababaha gaarka ah oo dhan lagu qoro xeerka.
- Xaruntu waxay ka hooseyn kartaa heerarka cabbirka (benchmarks) ee falanqaynta saameynta isu-geynta ee waajibka ah..

Waxaa kicin kara MPCA ama helitaanka iyo ka jawaabidda codsi:

- MPCA waxay dib-u-eegis ku samaysaa caddaynta muhiimka ah (material evidence) ee ay bixiyeen codsadyaashu, xaruntu, ama macluumaad kasta oo kale oo uu og yahay guddoomiyuhu si loo go'aamiyo in falanqaynta saameynta isu-geynta loo baahan yahay iyo in kale.
- Waxay isticmaashaa isla shuruudihii hore loogu sharaxay codsiyada si loo qiimeeyo suurtagalnimada saameynaha caafimaadka iyo deegaanka.
- Waxay sidoo kale siinaysaa xarunta ikhtiyaar ay si iskeed ah ugu codsato inay samayso falanqayn.



La-tashiga iyo Tixgelinnada Qabiilooyinka

La-tashiga iyo Tixgelinnada Qabiilooyinka

Habka ay Dowladaha Qabiilooyinku u dooran karaan in xeerarkan lagu dabaqo xarumaha ku yaal Indian Country::

- Minnesota waxay hore u leedahay hab la-tashi oo lagu qeexay Minn. Stat. § 10.65.
- Xeerarka waxay si toos ah u tixraaci doonaan qaanuunkan iyagoo ah habka la raacayo.

Xarumaha aan ku yaallin Indian Country:

- Xeerarka waxay qeexayaan shuruudaha MPCA looga baahan yahay inay kula shaqeyso Qabiilooyinka.
- Waxa ku jira shuruudo lagu xaqiijinayo in Qabiilooyinku helaan marin ay kula xiriiri karaan MPCA iyo xarunta inta lagu jiro habka xeerku socdo.
- Qabiilooyinka sidoo kale waxaa lagu martiqaadayaa inay bixiyaan macluumaad ay tahay in falanqaynta saameynta isu-geynta (CI analysis) ay ku darto ama qiimeyso.

Tixgelinnada Qabiilooyinka

- Hababka lagu ururinayo macluumaadka maadaama danaha, walaacyada, iyo aragtiyaha ay ku xirnaan doonaan goobta(goobaha) iyo Qabiilka(Qabiilooyinka) ay khusayso.
- Martiqaadyo loo fidinayo Qabiilooyinka si ay uga qayb qaataan kulamada dadweynaha iyo booqashooyinka goobaha, loo wadaago qabyo-qoraallada hore, iyo inay ka qayb galaan kulamada inta lagu jiro muddada faallooyinka dadweynaha.




Qaybta Qabiilooyinka ee Lagu Darayo Falanqaynta Saameynta Isu-geynta

Macluumaad gaar ah oo lagu qiimeynayo falanqaynta saameynta isu-geynta:

- Khayraadka dabiiciga ah iyo kuwa dhaqanka (dhirta iyo duurjoogta, isbeddellada ku yimaada biyaha, iyo isticmaalka kale).
- Dhaqamada soo jireenka ah (tirada duurjoogta iyo deegaanadooda ee ugaarsiga, kalluumaysiga, iyo ururinta khayraadka dabiiciga ah).
- Goobaha muhiimka ah (helitaanka goobaha, goobaha dhaqameed ama taariikhiga ah, goobaha barakaysan, iyo deegaanada ay ku nool yihiin khayraadka muhiimka ah).

Laba kulan oo dadweyne ayaa loo baahan yahay, mid ka hor iyo mid ka dib falanqaynta saamaynta isbiirsatay. Kulamo dheeraad ah ayaa lagu dari karaa.



Falanqaynta Saameynta Isu-geynta iyo Saameynaha Waaweyn ee Taban

Falanqaynta Saameynta Isu-geynta, Ka-qaybgalka Dadweynaha

Haddii falanqaynta saameynta isu-geynta (CI analysis) loo baahan yahay, isla markiiba lama soo gudbiyo; marka hore:

- Qorshe qeexaya sida milkiilayaasha iyo hawl-wadeennadu u qorsheynayaan inay u buuxiyaan shuruudaha ka-qaybgalka dadweynaha.
- Qorshaha waa in la soo gudbiyaa 30 maalmood gudahood ka dib marka MPCA ay ku daabacdo boggeeda internetka dukumeentiga go'aanka baahida falanqaynta saameynta isu-geynta.

Kulamada dadweynaha ka hor iyo ka dib samaynta falanqaynta saameynta isu-geynta:

- Kulanka koowaad ee dadweynaha ee saameynta isu-geynta wuxuu soo koobayaa sababta loogu baahan yahay falanqaynta saameynta isu-geynta wuxuuna siinayaa dadweynaha fursad ay uga faalloodaan waxa lagu dari doono falanqaynta saameynta isu-geynta.
- Kulanka labaad ee dadweynaha ee saameynta isu-geynta wuxuu soo koobayaa natiijooyinka falanqaynta saameynta isu-geynta wuxuuna siinayaa dadweynaha fursad ay uga faalloodaan in bixinta rukhsaddu ay keeni doonto Saameyn weyn oo taban.

CI Falanqaynta Saameynta Isu-geynta, Faahfaahinta Kulanka Dadweynaha

- Kulanka waxaa martigelinaya xarunta, MPCA-na way ka qaybgalaysaa
- Waxaa jira shuruudo ku saabsan goobta kulanka, waqtiga uu bilaabanayo, duubista kulanka, iyo helitaanka adeegyada luqadda
- Waxay qeexaysaa macluumaadka ay tahay in lagu bixiyo kulan kasta:
 - Soo-jeedinta ama nuxurka bandhigga.
 - Xaashiyaha xaqiiqooyinkat
- Muddada faallooyinka ee kulan kasta.
- MPCA axay ku daabacdaa agabka kulanka boggeeda internetka.



CI Falanqaynta Saameynta Isu-geynta

Falanqaynta saameynta isu-geynta waa isku mid iyada oo aan loo eegin nooca codsiga:

- Waa in la soo gudbiyaa ugu yaraan 45 maalmood ka hor kulanka labaad ee dadweynaha ee saameynta isu-geynta.
- Waxay ka kooban tahay macluumaad dheeraad ah, moodallo iyo falanqaynta khatarta, qaybta qabiilooyinka (haddii la bixiyo), iyo macluumaad ama falanqayn kale oo uu guddoomiyuhu go'aamiyo in loo baahan yahay.
- Waxay sidoo kale ka kooban tahay go'aaminta milkiilayaasha iyo hawl-wadeennada ee ku saabsan in bixinta rukhsaddu ay keeni doonto saameyn weyn oo taban oo ku timaadda deegaanka ama caafimaadka.

Macluumaadka la cayimay wuxuu muhiim u yahay MPCA si ay u gaarto go'aan ku saabsan saameyn weyn oo taban, iyadoo lagu salaynayo::


- Saameynaha lagu aqoonsaday caafimaadka iyo deegaanka ee aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaari karto.
- Qiimeynta lagu sameeyo shuruudaha lagu go'aaminayo saameyn weyn oo taban..

Go'aaminta Saameynaha Waaweyn ee Taban

Xeerarka waxay qeexayaan shuruudaha lagu go'aaminayo in saameyn deegaan ama caafimaad loo aqoonsado saameyn weyn oo taban.

MPCA waa inay tixgelisaa:

- Falanqaynta saameynta isu-geynta
- Faallooyinka dadweynaha iyo jawaabaha xarunta
- Culeysyada deegaanka ee jira.
- Saameynta dhaqan-dhaqaale ee xarunta.



Go'aaminta Saameynaha Waaweyn ee Taban, oo Sii Socota

MPCA waa inay qiimeysaa haddii saameynaha waaweyn ee taban la filayo inay dhacaan dhammaan xarumaha looga baahan yahay falanqaynta saameynta isu-geynta.

Qiimeynta saameynaha waaweyn ee taban waxaa ka mid ah:

- Qiimeynta natijoooyinka ka soo baxa moodallada iyo falanqaynta khatarta.
- Qiimeynta saameynaha la filayo iyadoo la adeegsanayo shuruudo la mid ah shuruudaha go'aan qaadashada ee loo isticmaalo marxaladda go'aaminta baahida falanqaynta saameynta isu-geynta.

MPCA waa inay diyaarisaa oo ku daabacdaa boggeeda internetka dukumeentiga go'aanka.



Shuruudaha Moodallada iyo Falanqaynta Khatarta

Moodallada tayada hawada iyo falanqaynta khatarta ayaa looga baahan yahay qayb ka mid ah falanqaynta saameynta isu-geynta:

- Moodallada tayada hawada ayaa loo baahan yahay marka wasakheeyayaashu ka sarreeyaan heerar cayiman oo qiiqa ah.
- Falanqaynta khatartu waxay adeegsan doontaa habraacyada jira si loo go'aamiyo baaxadda falanqaynta.


Shuruudaha Saameynaha Waaweyn ee Taban:

- Natiijooyinka moodallada tayada hawadu waxay muujinayaan in qiiqa ka imanaya isha uu ku biiriyo 50% ama ka badan heerka la oggol yahay.
- Natiijooyinka falanqaynta khatartu waxay muujinayaan in qiiqa ka imanaya isha uu sababo saameynta ugu badan ee ka sarreysa heerarka khatarta la aqbali karo (khatarta kansarka oo ah 1 qof 100,000-kii qofba, hazard quotient oo ah 1.0, iyo hazard index oo ah 1.0).

Shuruudaha Saameynta Deegaanka/Caafimaadka

- Waxaa loo baahan yahay hab lagu qiimeeyo saameynaha kala duwan ee suurtagalka ah ee deegaanka iyo caafimaadka.
- Shuruudaha qiimeyntu waxay la jaanqaadaan shuruudaha go'aan qaadashada ee hore loo isticmaalay, iyadoo ay jiraan qodobbadan:
 - Isla afarta shuruudood ayaa loo adeegsadaa go'aannada codsiga iyo go'aaminta baahida falanqaynta saameynta isu-geynta.
 - Waxaa lagu daray tixgelinta culeysyada deegaanka ee ka jira aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaari karto.
- Waxay sii haysaa habkii qiimeynta ee jiray, iyadoo diiradda la saarayo nooca go'aanka:
 - Go'aanka codsiga — “waxay yeelan kartaa suurtagalnimada saameyn weyn.”
 - Go'aanka falanqaynta saameynta isu-geynta — “waxay leedahay suurtagalnimada saameyn weyn.”
 - Go'aanka saameynta weyn ee taban — “waxay leedahay saameyn weyn.”

Laba kulan oo dadweyne ayaa loo baahan yahay, mid ka hor iyo mid ka dib falanqaynta saamaynta isbiirsatay. Kulamo dheeraad ah ayaa lagu dari karaa.



Kulamada dadweynaha iyo faallooyinka*

- Qeex hababka loo qabanayo kulamada iyo sida loo maareynayo faallooyinka uu sharcigu farayo.

Falanqaynta saamaynta isbiirsatay*

- Qeex waxyaabaha khasabka ah ee ay tahay inay falanqayntu ka koobnaato.
- Bixi ilaha macluumaadka dadweynaha.

Saamaynada weyn ee waxyeellada leh*

- Qeex shuruudaha ama halbeegyada lagu go'aaminayo saamayn weyn oo waxyeello leh oo ku timaadda deegaanka ama caafimaadka.
- Haddii la ogaado saamayn weyn oo waxyeello leh, heshiis faa'iido bulsho ayaa loo baahan yahay.

Heshiiska faa'iidada bulshada*

- Qeex waxyaabaha heshiisku ka koobnaanayo iyo habraaca lagu helayo talooyinka dadweynaha.
- *MPCA* iyo xaruntu waxay saxiixayaan heshiiska.
- Haddii la ogaado saamayn weyn oo waxyeello leh oo aan lagu gaari karin heshiis faa'iido bulsho, rukhsad lama bixin karo.

* Waxaa lagu qeexi doonaa xeerka.

Heshiisyada Faa'iidada Bulshada

Heshiiska Faa'iidada Bulshada, Ka-qaybgalka Dadweynaha

Haddii heshiiska faa'iidada bulshada (CBA) loo baahan yahay, isla markiiba lama soo gudbiyo; marka hore:

- Qorshe qeexaya sida milkiilayaasha iyo hawl-wadeennadu u qorsheynayaan inay u buuxiyaan shuruudaha ka-qaybgalka dadweynaha.
- Qorshaha waa in la soo gudbiyaa 30 maalmood ka dib marka MPCA ay ku daabacdo boggeeda internetka dukumeentiga go'aanka saameynta weyn ee taban.

Kulamada dadweynaha ka hor iyo ka dib diyaarinta heshiiska faa'iidada bulshada:

- Kulanka koowaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada wuxuu soo koobayaa sababta loogu baahan yahay heshiiska faa'iidada bulshada wuxuuna siinayaa dadweynaha fursad ay uga faalloodaan waxa lagu dari doono qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada.
- Kulanka labaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada wuxuu soo bandhigayaa qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada wuxuuna siinayaa dadweynaha fursad ay uga faalloodaan qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada ka hor inta aan heshiiska la soo jeediyay loo gudbin MPCA.

Heshiiska Faa'iidada Bulshada, Faahfaahinta Kulanka Dadweynaha

- Kulanka waxaa martigelinaya xarunta, MPCA-na way ka qaybgalaysaa.
- Waxaa jira shuruudo ku saabsan goobta kulanka, waqtiga uu bilaabanayo, duubista kulanka, iyo helitaanka adeegyada luqadda.
- Waxay qeexaysaa macluumaadka ay tahay in lagu bixiyo kulan kasta:
 - fact Nuxurka bandhigga
 - Xaashiyaha xaqiiqooyinka
- Muddada faallooyinka ee kulan kasta.
- MPCA waxay ku daabacdaa agabka kulanka boggeeda internetka.



Heshiiska Faa'iidada Bulshada

Qaab-dhismeedka guud ee heshiiska faa'iidada bulshada (CBA) ayaa lagu qeexay xeerarka:

- Macluumaad sharaxaad ah, faa'iidooyinka bulshada, jadwallada waqtiga, warbixinnada, iyo macluumaad kale.
- Waxa kale oo ku jira habraacyo lagu wax-ka-beddeli karo heshiiska faa'iidada bulshada mustaqbalka.

Dulmarka Habraaca:

- Qabyo-qoraalka heshiiska faa'iidada bulshada waxaa la diyaariyaa ka dib kulanka koowaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada.
- Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay waxaa la diyaariyaa ka dib kulanka labaad ee dadweynaha ee heshiiska faa'iidada bulshada waxaana loo gudbiyaa MPCA.
- MPCA waxay ku daabacdaa heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay boggeeda internetka waxayna bilaabaysaa habka dib-u-eegista heshiiska si ay u gaarto go'aan hordhac ah ka hor ogeysiiska dadweynaha ee qabyo-qoraalka rukhsadda.
- MPCA waxay saxiixdaa heshiiska faa'iidada bulshada ugu horrayn marka uu dhammaado muddada ogeysiiska dadweynaha ee qabyo-qoraalka rukhsadda, ugu dambayna maalinta rukhsadda la bixiyo.

Go'aaminta Heshiiska Faa'iidada Bulshada

Habka go'aan qaadashada sidoo kale waxaa lagu qeexay xeerka.

MPCA waxay tixgelin doontaa dhammaan macluumaadka la heli karo:

- Tallaabada rukhsadda ee la codsaday
- Falanqaynta saameynta isu-geynta
- Saameynta weyn ee taban ee la aqoonsaday
- Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay
- Faallooyinka dadweynaha iyo jawaabaha xarunta



Go'aaminta Heshiiska Faa'iidada Bulshada, oo Sii Socota

MPCA waxay go'aamin doontaa in milkiilayaasha iyo hawl-wadeennadu ay dhammaystireen shuruudaha lagu cayimay:

- Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay, iyo waxa ku jira heshiiska, waxaa loo diyaariyay si waafaqsan xeerarka.
- Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay, iyo jawaabaha xarunta ee faallooyinka, waxay wax ka qabtaan arrimaha lagu soo qaaday muddada faallooyinka dadweynaha.
- Heshiiska faa'iidada bulshada ee la soo jeediyay wuxuu mudnaan siinayaa tixgelinnada si toos ah u saameeya dadka deggan aagga caddaaladda deegaanka ee ay saameyntu gaari karto.

Bixinta Rukhsadda

Haddii falanqaynta saameynta isu-geynta loo baahan yahay il wasakheynaysa:

- MPCA ma bixin karto rukhsadda ka hor 30 maalmood laga bilaabo kulankii ugu dambeeyay ee dadweynaha ee la qabtay.
- MPCA waxaa waajib ku ah inay tixgeliso falanqaynta saameynta isu-geynta iyo faallooyinka ama markhaatifurka la soo gudbiyay marka ay go'aaminayso inay bixiso ama diido rukhsadda.
- MPCA waxaa waajib ku ah inay go'aamiso haddii bixinta rukhsaddu ay la xiriiri doonto saameyn weyn oo taban, haddii ay sidaas tahayna waa inay diido rukhsadda haddii aan MPCA iyo xaruntu gelin heshiis faa'iido bulsho.

Haddii heshiiska faa'iidada bulshada loo baahan yahay:

- Heshiisyada faa'iidada bulshada waa in la saxiixaa ugu dambayn maalinta rukhsadda la bixinayo.
- MPCA waxay bixin kartaa rukhsad ay ku jiraan shuruudo lagu xaddidayo dhismaha ama hawlgalka.

Select a stressor

- Cumulative impacts summary
- Air pollution +
- Land pollution +
- Water pollution +
- Traffic factors +
- Social factors +
- Public health factors +
- Neighborhood factors +

Map options

- Show statewide data
- Show Indian Country
- Show MPCA air quality permits

Overview Search results Buffer tool

50 mi

Stressor overview

Cumulative impacts

The total number of adverse stressors

This tool was created by the Minnesota Pollution Control Agency to help identify communities disproportionately affected by sources of pollution, and those with characteristics that make them more sensitive to pollution. The tool displays the combined effects of current and past pollution on health, well-being, and quality of life.

This map displays the number of adverse stressors for each population of a census tract. The map shows the number of stressors that can be explored further in the table of contents. An indicator that exceeds the state or middle) for that given indicator. For more information on environmental justice initiatives, including further assistance interacting with cumulative impacts web page.

Data dates: This data was collected between 2017 and 2025. Each environmental justice area has specific data source information.

More information on background, methodology, and data sources for stressors can be found in the [CI-MAP technical document \(opens PDF\)](#).

Cumulative impacts mapping and analysis platform (draft 2026)

- [Abra una guía en español de este sitio web.](#)
- [Fur hagaha Soomaaliga ee boggan.](#)
- [Ohib phau ntawv qhia uas ua lus Hmoob rau lub website no.](#)


This is a draft version of the cumulative impacts mapping and analysis platform, designed to support the Minnesota Pollution Control Agency's cumulative impacts analysis rules that govern permit decisions in environmental justice areas. The cumulative impacts analysis rules apply to facilities in or within one mile of an environmental justice area in the Twin Cities seven-county metro area and the cities of Duluth and Rochester. This tool identifies and provides a publicly accessible database of environmental stressors by census tract. Environmental stressors are factors that may make people susceptible to harm from exposure to pollutants.

This tool allows permit applicants to specify a location and gather data on environmental stressors that are present in environmental justice areas within a one-mile radius around their proposed project. This tool can also be used by residents that live in or near an environmental justice area to better understand the stressors present in their communities.

For more information on environmental justice initiatives, including cumulative impacts or further assistance interacting with this application, visit the MPCA's [Cumulative Impacts web page](#). More information on background, data sources, and methodology for stressors can be found in the [CI-MAP technical document \(opens PDF\)](#).

For questions please contact: cumulativeimpacts.pca@state.mn.us

Close Launch tour



Esri, USGS | MPCA, US Census Bureau

Powered by Esri

Contact us:
Environmental emergencies (24 hours): 800-422-0798
[Submit a question](#)


©2026 Minnesota Pollution Control Agency
[Nondiscrimination and civil rights](#) | [Privacy rights](#) | [Website policies and disclaimers](#)
Minnesota Pollution Control Agency is an equal opportunity employer.

CI-MAP: Madasha Khariidaynta iyo Falanqaynta Saameynta Isu-geynta

Luqadda Sharciga ee Ku Saabsan Culeysyada Deegaanka

- Waxay qeexaysaa “culeysyada deegaanka” (environmental stressors)
- Culeysyada deegaanku waa qayb ka mid ah go’aaminta haddii bixinta rukhsaddu ay keeni doonto saameyn weyn oo taban oo ku timaadda deegaanka ama caafimaadka
- MPCA waa inay haysaa xog-ururin dadweyne oo la cusboonaysiiyo oo ku saabsan culeysyada deegaanka ee la aqoonsaday ee ku jira qaybaha tirakoobka dadweynaha
- MPCA waa inay dejisaa waxa ay tahay inay ka koobnaato falanqaynta saameynta isu-geynta (CI analysis) isla markaana bixisaa ilaha macluumaadka dadweynaha ee codsabayaashu ka heli karaan xogta ku saabsan culeysyada deegaanka ee ka jira aagga caddaaladda deegaanka.

Culeysyada Deegaanka



Sida CI-MAP Looga Adeegsado Qayb ka mid ah Xeerarka

MPCA waxay tixgelisaa culeysyada deegaanka marka ay go'aaminayso:

- In falanqaynta saameynta isu-geynta (CI analysis) loo baahan yahay.
- In bixinta rukhsaddu ay keeni doonto saameyn weyn oo taban oo ku timaadda deegaanka ama caafimaadka.

Codsadayaasha waxaa looga baahan yahay inay:

- Ku daraan macluumaadka CI-MAP qiimeyntooda bilowga ah.
- Tixgeliyaan culeysyada deegaanka iyo sida ay u kordhin karaan baaxadda saameynaha taban.

Macluumaadka CI-MAP

- MPCA waxay bixisaa macluumaad ku saabsan qayb kasta oo tirakoobka dadweynaha iyo isbarbardhigyo lagu sameeyo heerarka tixraaca ama heerarka isbarbardhigga ee degmada ama gobolka oo dhan
 - Ujeeddadu waa in la suurtageliyo hab lagu tixgeliyo culeysyada deegaanka marka la samaynayo go'aannadan.
- Waxay suurtagelisaa falanqayn isbarbardhig ah oo lagu sameeyo culeysyada deegaanka ee gaarka ah marka aysan jirin heerar tixraac ah.
- Waxay suurtagelisaa falanqayn isbarbardhig ah oo lagu tixgelinayo saameynta isu-geynta ee culeysyo deegaan oo badan.

Jadwalka Horumarinta iyo Cusboonaysiinta CI-MAP

- CI-MAP waxaa laga heli karaa bogga internetka ee MPCA:

- <https://pca-gis02.pca.state.mn.us/ci-map/>



CI-MAP

- Horumarintii hore:

- Nooca 1-aad (Release 1) wuxuu si rasmi ah u shaqo bilaabay Diseembar 16, 2025.
 - Nooca 2-aad (Release 2) wuxuu si rasmi ah u shaqo bilaabay Maajo 18, 2026, isla waqtigaas oo la daabacay Ogeysiiska Ujeeddada Ansixinta Xeerarka.
 - Nooca 3-aad (Release 3) waxaa la qorsheeyay sannadka 2027, iyadoo la socota ansixinta kama dambaysta ah ee xeerka.

- Cusboonaysiinta iyo dayactirka mustaqbalka:

- Xogta tirakoobka dadka ee aagagga caddaaladda deegaanka (EJ areas) waxaa la cusboonaysiin doonaa ugu yaraan shantii sano mar.
 - Xogta culeysyada deegaanka waxaa la cusboonaysiin doonaa marka loo baahdo.



Jadwalka Dejinta Xeerka & Tallaabooyinka Xiga

Jadwalka Ku-meelgaarka ah ee Dejinta Xeerka

Xagaaga/Dayrta 2026

Dhageysiga dadweynaha iyo muddada faallooyinka

- MPCA waxay dib-u-eegis ku samaysaa faallooyinka, waxay diyaarisaa jawaabaha faallooyinka, waxayna tixgelisaa wax-ka-beddel kasta oo lagu samayn karo xeerka.

Dayrta 2026

Dib-u-eegista Garsooraha Sharciga Maamulka iyo warbixinta ku saabsan xeerka la soo jeediyay

- Wuxuu ansixiyaa ama diidaa xeerka ama qaybo ka mid ah xeerka.

Gu'ga 2027

Daabacaadda Ogeysiiska Ansixinta (marka la ansixiyo).

- MPCA waxay samaysaa wax-ka-beddellada loo baahan yahay ama la soo jeediyay si wax looga qabto qodobbada ku jira warbixinta Garsooraha.

Gudbinta Faallooyinka Qoran

Ku soo gudbi faallooyinkaaga qoran ee ku saabsan xeerarka la soo jeediyay ugu dambayn **Luulyo 17, 2026:**

- Maxkamadda Dhageysiyada Maamulka ee Dejinta Xeerarka e-Comments
 - <https://minnesotaoah.granicusideas.com/>
- Habab kale oo lagu aqoonsaday Ogeysiiska Ujeeddada Ansixinta Xeerarka
 - Boostada Maraykanka, keenis qof ahaan ah, ama fakis (fax)..
- **Faallooyinka waa in la soo gudbiyaa ugu dambayn 4:30 galabnimo.**

Xiriirka bogga e-Comments sidoo kale wuxuu ku yaal bogga dejinta xeerka:

- <https://www.pca.state.mn.us/get-engaged/cumulative-impacts>



E-Comments



**Bogga Dejinta Xeerka
Saameynta Isu-geynta**

Ilooyin Dheeraad ah

Macluumaad ku saabsan dejinta xeerkan

- <https://www.pca.state.mn.us/get-engaged/cumulative-impacts>



**Bogga
Dejinta
Xeerka
Saameynta
Isu-geynta**

Su'aalaha ku saabsan dhinacyada farsamo ama nuxurka xeerka

- Hassan Bouchareb | 651-757-2653 | Hassan.Bouchareb@state.mn.us
- Jawaabaha waxay ku koobnaan doonaan macluumaadka horey ugu jira SONAR-ka.
- Haddii su'aashaada aan looga jawaabin SONAR-ka, fadlan u soo gudbi faallo ahaan.

Su'aalaha ku saabsan habka dejinta xeerarka ama sida loo gudbiyo faallooyinka

- Katie Izzo | 651-757-2595 | Katie.Izzo@state.mn.us

Waa maxay su'aalaha aad qabtaan?

Waad ku mahadsan tihiin waqtigiinna iyo xiisaha aad u qabtaan ka qaybqaadashada geeddi-socodkan dejinta xeerka!